

# Ogow Miisaaniyada Degmada



Miisaaniyadda Lagu Talliyay 2026-27



## Soo Koobista Fulinta

### **Ebony N. Shelton**

Sarkaalka Sare ee Maamulka

### **Joan Bracci**

Kaaliyaha Sarkaalka Sare ee  
Maamulka/ Sarkaalka Sare ee  
Maaliyadda

**Brian Albright**, Maamulaha Guud  
Kooxda Dawladda Guud iyo Maaliyadda

**Dr. Elizabeth Hernandez, Ph.D.**, Maamulaha Guud  
Waxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada

**Dahvia Lynch**, Maamulaha Guud  
Kooxda Deegaanka iyo Isticmaalka Dhulka

**Andrew Strong**, Maamulaha Guud  
Kooxda Badqabka Dadweynaha

# Diirada Saaaraya Maalgalinaha. Tallaabo Wadajir ah Horumarka Bulshadu Dhistay.

Miisaaniyadda lagu taliyey ee FY 2026–27 waxaa la diyaarinayaa xilli adag oo ay jirto hubanti la'aan, waxaana kamid ah ilaha maalgelinta oo aan la jaanqaadayn korodhka guud ee kharashaadka shaqada, qiimaha adeegyada oo sii kordhaya, iyo tallaabooyinka dowladda gobolka iyo tan fadaraalka oo abuuraya cadaadisyo cusub oo saameynaya adeegyo badan oo ay dadku ku tiirsan yihiin. In kasta oo ay jiraan caqabadahan, miisaaniyaddani waxay muujinaysaa waxa aan wadajir ku gaadhi karno — shaqaalaha dowladda, mas'uuliyiinta la doortay, iyo idinka oo ah bulshada aan u adeegno — annagoo ku mideysan ballanqaadkeenna wadajirka ah ee xasilloonida, helitaanka adeegyada, iyo fursadaha.

*Waxaan kugu martiqaadaynaa inaad ogaato maalgelinta la beegsanayo, tallaabooyinka lagu keydinayo kharashaadka, iyo hagaajinta hawlgalka ee ilaalinaya adeegyada isla markaana xoojinaya adkeysiga bulshada.*



# Guddiga Kormeerayaasha



**Paloma Aguirre**  
Kormeere  
Degmada 1



**Joel Anderson**  
Kormeere  
Degmada 2




**Terra  
Lawson-Remer**  
Kormeere  
Degmada 3



**Monica  
Montgomery Steppe**  
Kormeere  
Degmada 4



**Jim Desmond**  
Kormeere  
Degmada 5



# Farriin katimid Sarkaalka Sare ee Maamulka

Oo ku socota bulshada, Maalin kasta, shaqada Degmadu waxay ka bilaabantaa adiga — codadkaaga, waaya-aragnimadaada, iyo rejadaada ku aaddan gobolka. Fekerkaaga, ha ahaado mid loo maro wada-hadallada bulshada, lashaqaynta shaqaalaha, ama isdhexgalka maalinlaha ah, kaliya masii wadayso uun waxa aanu qabanno, balse sidoo kale sida aan u qabannayno ayay wax ku daraysaa. Tani waa ballanqaadkeyga aan kuu hayo anigoo ah adeeg-bixiye dowladeed iyo sidoo kale deriskaaga.



**Ebony N. Shelton**  
Sarkaalka Sare  
ee Maamulka

Qorshaha Hawlgelinta ee uu soo jeediyay CAO wuxuu ka tarjumayaa shaqadaas wadajirka ah. Waxay ku dhisan tahay qiyamkeenna wadajirka ah, waxaa qaabeeyay tallooyinka bulshada, waxayna diiradda saaraysaa bixinta natiijooyin macno leh oo la cabbiri karo. Waa miisaaniyad ku saleysan qiyam, loona qaabeeyay isla markaana ka kooban waxa ugu muhiimsan dadka aan u adeegno.

Waxaan galeynaa sannad-miisaaniyadeedkan xilli ay jirto hubanti la'aan iyo kala-guur. Korodhka ilaha maalgelintu ma la jaanqaadayaan korodhka guud ee kharashaadka ku baxa socodsiinta hawlaha, isla markaana tallaabooyinka dowlad-goboleedka iyo fadaraalku waxay abuuraan cadaadisyo cusub oo saameynaya adeegyo badan oo ay dadku ku tiirsan yihiin. Caqabadahani waa kuwo dhab ah, balse Degmadu way isu diyaarisay inay waajahdo. Waxaan weli diiradda saaraynaa xasilloonida, sii wadidda adeegyada, iyo mas'uuliyadda aan u hayno bulshooyinkeenna.

Annagoo si wadajir ah ula shaqaynayna Guddiga Kormeerayaasha Degmada, guddi-hoosaadyadooda Ku-meelgaadhka ah, kooxda shaqaalaha Degmada, iyo bulshooyinka kala duwan ee aan u adeegno, waxaan wax ka qabanay qaar ka mid ah arrimaha ugu culus ee gobolka. Hannaanka miisaaniyadeennu waa mid xog-ogaalnimo oo ku-salaysan bulshada si ka badan sidii hore, isla markaana weli la jaanqaadaya xasilloonida maaliyadeed ee muddada dheer. Isticmaalka taxaddarka leh ee keydka maaliyadeed ee Guddigu wuxuu naga caawiyay inaan daboolno baahiyaha degdegga ah anagoon lumin fiirinta mustaqbalka.

Si wadajir ah, waxaan aqoonsannahay in xilligan uu u baahan yahay maalgelin ilaalisa xasilloonida, xoojisa nidaamyada, isla markaana hagaajisa natiijooyinka dhammaan dadka ku nool gobolka. Miisaaniyaddan la soo jeediyay waxay ka tarjumaysaa xaqiiqadaas, iyadoo sidoo kale qiraysa in baahiyaha bulshada ay sii kordhayaan. Maalgelinteennu waa inay buuxiso xilliga ujeedo leh saameyn muuqata.

*(sii socda.)*

# Farriin katimid Sarkaalka

## Sare ee Maamulka *(sii socda.)*

**Xaasilka taageerada badqabka (H.R. 1 jawaabta):** Ku dhawaad \$24 milyan ayaa ka caawinaya dadka inay sii haystaan helitaanka kaalmada cuntada iyo caymiska caafimaadka iyadoo ay jiraan dhimista fadaraalka, iyadoo sidoo kale lacag dheeraad ah oo ka timaadda keydka la furay la heli karo marka baahidu soo baxdo.

**Adeegyada Hab-dhaqanka Caafimaad:** \$140.7 milyan oo kharash dheeraad ah ayaa kordhinaya helitaanka daryeelka ee dhammaan heerarka baahida, iyadoo sidoo kale ka caawinaysa dadka inay helaan taageero ku habboon oo waqtigeeda ku timaadda.

**Jawaabta dhibaatooyinka hoy la'aanta iyo guriyeynta:** Maalgelintu waxay taageertaa ka hortagga, joogtaynta guriyeynta, horumarinta, nadiifinta, kormeerka, iyo fududeynta dib-u-eegista isticmaalka dhulka si looga caawiyo dadka inay lasii joogaan bulshooyinkooda.

**Daryeelka deegaanka:** Sarkaal cusub oo Hoggaamiya Ka-hortagga Dikhawga ayaa ka caawin doona hoggaanka dedaalladeenna, isla markaana xoojin doona iskaashiga gobolka si loo aqoonsado khayraadka iyo xalalka doxada Webiga Tijuana.

**Maalgelinta bulshada:** Miisaaniyaddani waxay sii waddaa ballanqaadka Degmadu ee dhinacyada fanka iyo dhaqanka, waxayna bilaabaysaa hindise cusub oo ku saabsan dhinacyada filimada, isla markaana xoojinaysa adeegyada ilaalinta macaamiisha. Waxay sidoo kale maalgelisaa dedaallo muhiim ah oo caafimaadka bulshada ah oo hubiya in dadka ay helaan daryeelka iyo kheyraadka ay u baahan yihiin. Sidoo kale, waxay xoojinaysaa badqabka dadweynaha iyadoo la dhisayo saldhig-hoosaad cusub oo ah Talis ku yaalla Ramona, kaas oo beddelaya xarunta hadda jirta ee ka badan afartan sano jir-, waxayna sidoo kale bilaabaysaa qorsheynta, dib u eegista deegaanka, iyo naqshadeynta xarun cusub oo Xabsiga Vista ah si loo gaadho ujeedooyinka hawlgaal ee muddada dheer.

**Wax ka qabashada Prop 36:** Nidaamyada cadaaladda iyo amniga dadweynaha waxaa lagu xoojinayaa iyadoo lagu darayo shaqaale iyo kheyraad muhiim ah si loo hubiyo in waaxyuhu ay gudan karaan mas'uuliyadaha cusub ee ka imanaya Prop 36, oo wax ka qabanaya xatooyooyinka soo noqnoqda iyo dambiyada maandooriyaha, isla markaana kordhinaya taageerada ka qaybgalka daawaynta.

# Farriin katimid Sarkaalka Sare ee Maamulka *(sii socda.)*

Miisaaniyaddan la soo jeediyay oo ka badan \$9 bilyan, isla markaana boqolkiiba 6 ka badan tii sanadkii hore, waxay u taageertaa gobolka siyaabo kala duwan, waxayna ka turjumaysaa shaqaale gaadhaya 20,388 shaqaale. Waxa kujira korodh saafi ah oo gaadhaya 108 boos, taas oo inta badan ka dhalatay koritaanka adeegyada Ilaalinta Macaamiisha, hirgelinta Prop 36, iyo ka jawaabidda H.R. 1, waxaana la dhimay iyadoo la tixgelinayo boosaska bannaan ee aan la buuxin, mideynta, iyo shaqo ka tagista.

Isku dheelitirka miisaaniyada lagu taliyay waxay u baahan tahay go'aano adag. Waxaan diirada saarnay isku-dheelitirka. Taas waxay ka dhigan tahay in la helay hufnaan cusub, in la dhimay kharashaadka, in la yareeyay baaxadda xarumahayaga, iyo in shaqaalaha loo wareejiyay si ay u daboolaan mas'uuliyadaha isbeddelaya, iyadoo laga fogaanayo shaqaale dhimis. Waxaan ogsoonahay in caqabadahan ay naga horeeyaan, oo shaqadinana ay soconayso.

Waxaan doonaynaa inaan aqoonsano shaqaalahayaga Degmada ee hal-abuurka leh isla markaana shaqadu ka go'an tahay. Adeegga dadweynaha ayaa ah udub-dhexaadka hay'addan, shaqaalaheennuna waa kuwa guud ahaan nooleeya qorshahan. Aqoontood a, naxariistooda, iyo dareenkooda qotada dheer ee leh ujeeddo adeeg ayaa ka dhigaya dhammaan dedaalladan kuwo suurtagal noqda. Ma jiri karto mahadnaq iyo farxad ka weyn inaan la shaqeeyo iyaga.

Waxaan rejaynayaa, inay naga go'naato inaad si qoto dheer kuulasii shaqayno. Waxaan sii wadi doonaa inaan kordhino helitaanka macluumaadka, kordhino daahfurnaanta, oo aan abuurto dariiqyo badan oo lagaga qaybgali karo. Hadafkayagu waa in qof walba uu dareemo inuu xog haysto, la soo dhoweeyay, isla markaana la socdo sida go'aannada loo gaadho iyo sida uu uga qayb qaadan karo qaabayntooda.

Waxaan sii wadi doonaa dhageysiga, laqabsiga, iyo dhisidda mustaqbal ku dhisan qiyamkeenna wadajirka ah iyo ujeeddo mideysan. Taas ayaa ah waxa ay mas'uuliyadda daryeelka iyo ilaalinta kheyraadku u baahan tahay, iyo waxa ay bulshooyinkeennu mudan yihiin.

Wadashaqayn iyo Ujeedo Midaysan,



Sarkaalka Sare ee Maamulka,  
**Ebony N. Shelton**

# Hiigsiga, Himilada, & Qiyamka Degmada *Dhisida Adkaysiga Mustaqbalka*

## Himiladayada

Waxaan xoojin doonnaa bahdayada annagoo adeegsanayna adeegyo hal-abuur leh, loo dhan yahay, kuna saleysan xog, iyadoo la adeegsanayo shaqaale xirfad leh oo la taageeray.

## Hiigsigayaga

Kaliya, mustaqbal ku dhisan adkaysi iyo joogtayn loowada dhan yahay.

## Qiyamkayaga

- **Sumcad** – Daacadnimo, hab-dhaqan anshax leh iyo isla xisaabtan
- **Sinnaanta** – Helitaan loo siman yahay iyo wadashaqayn dhammaan bulshada oo dhan ah
- **Helitaanka** – Daahfurnaanta iyo loo dhannaanshaha gaadhsiinta adeegga
- **Lahaanshaha** – Abuurista dareen loo dhannaansho ah iyo isku xidhnaan
- **Sarraynta** – Ballanqaadka adeegyo tayo sare leh, si joogta ah loo horumarinayo
- **Joogtaynta**– Isku dheelitirka baahiyaha hadda iyo kuwa mustaqbalka iman kara



# Adeegyada Degmada Mas'uuliyadaha Gobolka, Heer Dowlad-goboleed & Heer Degmo

Degmada San Diego waxay leedahay dhul ballaaran oo aan ku jirin magaalooyin is-maamula, iyadoo sidoo kale ay ku jiraan 18 magaalo oo is-maamula iyo 18 qabiil oo heer fadaraal ahaan loo aqoonsan yahay. Waxaan bixinnaa adeegyo kala duwan — laga bilaabo barnaamijyada bulshada iyo badqabka dadweynaha ilaa waddooyinka, goobaha nasashada, iyo maktabadaha ku yaalla meelaha aan ku jirin goobaha is-maamula



18 Ismaamul Magaalooyin ah



Deegaan aan ku jirin magaalo is-maamul



Magaalooyin heshiis la galay



Magaalooyinka qaar ayaa heshiis la galay Degmada si ay u siiso adeegyada.



Heer gobol ahaan, dowladda Degmadu waxay bixisaa adeegyo sida:

- Adeegyada bulshada iyo barnaamijyada caafimaadka
- Dacwad ku-oogista dambiyada, xarumaha xabsiyada, iyo u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah.
- Kormeerka cuntada iyo maqaayadaha, iyo la socodka tayada biyaha xeebaha.
- Dooroshooyinka



Deegaanada aan ku jirin magaalooyinka is-maamula, dowladda Degmadu waxay siisaa adeegyo ay caadi ahaan bixiso dowlad magaalo, sida:

- Ciidama dab-demiska iyo booliska
- Waddooyinka, goobaha nasashada iyo maktabadaha
- Sharciyada dhismayaasha
- Hoyada iyo ilaalinta xayawaanaadka

# Ilamaha Maalgelinta & Miisaaniyadda Degmada

## Sida Aan u Maalgelino Bulshadayada

Ilaha kale

13%

Kharashaadka adeegyada

17%

Dawladdaha fadaraalka, goboleedka ama kuwa kale

48%

Cashuuraha hantida

22%



# Hannaanka Miisaaniyada Degmada & Tallaabooyinka Xiga

## Sida Miisaaniyadu U Dhisantahay iyo Doorakaaga

Miisaaniyadda lagu taliyey ee sannad-maaliyadeedka 2026–27 waxaa lagu dhisayaa iskaashi dhow oo dhex mara Sarkaalka Sare ee Maamulka, Guddiga Kormeerayaasha, iyo bulshooyinka aan u adeegno. Ra'yiga bulshada ayaa udub-dhexaad u ah shaqadan — miisaaniyadda lagu taliyey looma qaabeeyo si gooni ah, balse waxaa lagu qaabeeyaa tallooyinka joogtada ah ee shacabka, xogta la ururiyo, iyo mudnaanaha la wadaago. Habkan wuxuu xoogga saarayaa helitaanka xog badan oo furan, ka-qaybgal dadweyne oo micno leh, -iyo go'aan-qaadasho isku habaysan oo wadajir ah.

### Sidee ayaa Miisaaniyada Loo Sameeyaa

- 

Sarkaalka Sare ee Maamulka wuxuu bisha May soo saaraa miisaaniyadda lagu talliyey, taasoo lagu saleeyo kaqaybgalka bulshada, tilmaamaha Guddiga Kormeerayaasha, iyo baahiyaha hawlgelinta.
- 

Macluumaadka miisaaniyadda waxaa lala wadaagaa dadweynaha inta lagu jiro shirarka bulshada.
- 

Ra'yiga dadweynaha waxaa lagu soo gudbiyaa si onlaayn ah iyo kulamada dhageysiga dadweynaha.
- 

Miisaaniyad dib loo eegay ayaa la diyaariyaa, iyadoo lagu darayo tallooyinka iyo ra'yiga bulshada.
- 


Guddiga Kormeerayaasha waxay ka doodaan oo ay ansixiyaan miisaaniyad, taasoo dhaqangasha 1 da Julaay.

# Muddada Miisaaniyada Degmada Taariikhaha Muhiimka ah iyo Kulamada Dadweynaha

## Waan Kuu Baahanahay

Waxaa weli jira shaqo muhiim ah ayaa na hortaalla ka hor inta aan miisaaniyadda la ansixin—nagalasoo qaybgal si aan uga dhigno mid si guul ah oo la dhammaystiro.

## Taariikhaha Muhiimka ah



# Sida aad Uga Qaybqaadan Karto

## Dib u Eegis iyo Faallo: May 18 - Juun 11

Si onlaayn kaga qaybgal [engage.sandiegocounty.gov/county-budget-2026-28](https://engage.sandiegocounty.gov/county-budget-2026-28)

- Farriin uga dir iimaylka [engage@sdcounty.ca.gov](mailto:engage@sdcounty.ca.gov)
- Kulanka Fogaan Aragga ah ee Bulshada ee dhacaya May 27 waktiguna yahay 5:30 p.m.
- Madalaha Bulshada u Furan ee ka dhacaya Xarunta Hawlgalada Degmada taariikhdu markay tahay May 28 wakhtiguna yahay 5-7 p.m.
- Telefoon ahaan ama si toos ah kaga soo qaybgal Juun 1 si aad uga qayb gasho dhageysiga dadweynaha ee Guddiga Kormeerayaasha: [sandiegocounty.gov/cob/bosa/](https://sandiegocounty.gov/cob/bosa/)
- Codsiga turjumaada inta lagu jiro kulamada: **619-531-5434** ama [PublicComment@sdcounty.ca.gov](mailto:PublicComment@sdcounty.ca.gov)



### Booqo:

[sandiegocounty.gov/budget](https://sandiegocounty.gov/budget)  
si aad u hesho macluumaad  
ku saabsan miisaaniyada



**Ka Daawo  
Kulanka Guddiga  
Kormeerayaasha**



[SanDiegoCounty.gov](https://SanDiegoCounty.gov)



[@countysandiego](https://@countysandiego)



[@SanDiegoCounty](https://@SanDiegoCounty)




[@sandiegocounty](https://@sandiegocounty)

# Maalgashiyada ay u kala baxaan Kooxaha Ganacsiga & Hawlaha

**Wadarta Miisaaniyada: \$9.15 Bilayn+**

*Korodh dhan \$518.7 milyan, ama 6% marka la barbardhigo sanadkii hore.*



*(sii socda.)*

# Miisaaniyaddayada oo la Waafajinayo Qiyamka Bulshada

Markii aan diyaarinaynay miisaaniyada sannadkan, waxaa si cad u muuqatay in ansixintii H.R. 1 ee sanadkii hore — oo ah sharci heer fadaraal ah oo saameyn weyn ku leh maalgelinta adeegyada ammaanka bulshada ee xaasilka ah — iyo isbeddellada kale ee maalgelinta heer gobol iyo fadaraalba ay keeni doonaan saameyn dhab ah oo ka dhalata guud ahaan gobolkayaga. Anagoo ka jawaabayna arrintaas, waxaan ka faa'iideysannay fursad aan dib ugu habeynno nidaamkayaga, waxaan sii wadnay inaan diiradda saarno waxa ugu muhiimsan: taageerada dadka aan u adeegno.

Waxaan maalgelinaynaa ku dhowaad \$24 milyan si loo ilaaliyo adeegyada muhiimka ah ee xaasilka ammaanka bulshada loona xoojiyo xasilloonida bulshada guud ahaan degmada. Dheeho sida maalgalinahan ay u waafaqsan yihiin mudnaanaha muhiimka ah ee lagu ogaaday fekerkaaga.




# Shaqaalaha Degmada

## 20,388.25 Boos

\* Korodh dhan 108 boos ayaa la sameeyay, taasoo inta badan ay keentay korodhka Ilaalinta Macaamiisha, ka jawaabista Prop 36, iyo hirgelinta H.R. 1, iyadoo sidoo kale la dhimay 114 boos iyadoo la adeegsanayo boosaska bannaan ee aan la buuxin, iskudarka shaqooyinka, iyo shaqo katagis muddo kadib, iyadoo aan la samayn shaqaale dhimis.

Inkasta oo isbeddelladan la sameeyay, miisaaniyadda lagu taliyey waxay weli mudnaan siisaa taageerada shaqaalaha, hal-abuurka shaqaalaha, iyo joogtaynta maaliyadeed ee muddada dheer.



# Maalgalinaha Mudnaanta leh

Iyada oo loo marayo xog-ururino, kooxo dood-wadaag ah, iimayllo, wicitaanno, iyo habab kale, waxaad noo sheegteen waxa idiin muhiimka ah. Dheeho sida miisaaniyaddan ay mudnaannadaas ugu beddelayso ficil dhab ah.

*\*\* Qaar ka mid ah isbeddellada la muujiyey waxay ka tarjumayaan sida aan maalgelinta ula waafajinayno istaraatiijiyado cusub, hagaajinta shaqaalaha, iyo hufnaanta hawlaha shaqo. Isbeddelladani waxay ka tarjumayaan dib u habeyn la isku waafajinayo qaababka hadda jira ee barnaamijyada iyo ilaha maalgelinta ee la heli karo. Xaalado badan, kharashaadka ayaa dib loo kala saaray ama loo wareejiyey ilo kale oo maalgelin ah, balse adeegyada aasaasiga ah weli waa mudnaan waxaana sii socda taageeradooda.*



# Maalgalinaha Mudnaanta leh Hab-dhaqanka Caafimaad



Adeegyada Hab-dhaqanka Caafimaad waxay bixiyaan daryeel gaar ah oo caafimaadka hab-dhaqanka ah oo loogu talagalay dadka ka faa'iideysta Medi-Cal guud ahaan gobolka. Qorshahan wuxuu maalgelinayaa in ka badan \$1.39 bilyan si loo xoojiyo helitaanka adeegyada, daaweynta, iyo daryeel ku saleysan baahida qofka ee dadka da' kasta leh. Iyada oo loo marayo BHSA, BH CONNECT, iyo dedaallo kale, Degmadu waxay ballaadhinaysaa kababka Medi-Cal, waxay hagaajinaysaa ka jawaabista xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dhimirka, waxay dhisaysaa shaqaalaha caafimaadka hab-dhaqanka, waxayna kordhinaysaa fursadaha hoyga ee dadka qaba xanuunnada daran ee dhimirka iyo/ama dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha.

## Maalgalinaha waxa Kujira:

- **Daryeelka Deggenaanshaha & kan Muddada Dheer — \$176 milyan**  
Waxay bixisaa daryeel caafimaad iyo taageero 24-saac ah oo lagu hayo jawi nidaamsan oo daaweyn leh, looguna talagalay dadka u baahan heer daryeel oo sare.
- **Wax kaqabashada Guryaha — \$88 milyan**  
Waxay bixisaa [dhammaan noocyada kala duwan ee guryeynta](#) si loo hubiyo in dadka ay haystaan hoy inta ay helayaan daaweyn iyo adeegyo taageero. Tani waxaa ka mid ah tijaabada Iskudhafka Guriyeynta Dabacsan, taasoo qayb ka ah kabka cusub ee kirada ku-meelgaadhka ah, isla markaana xoojin doonta xasilloonida guryaha muddada dheer.
- **Hirgalinta BH CONNECT — +\$47.3 milyan\*\***  
Waxay kordhinaysaa daryeelka caafimaadka dhaqanka ee ku saleysan bulshada iyada oo loo marayo barnaamijyo ku dhisan caddeyn oo taageera carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba xaalado adag.
- **Daaweynta Icticmaalka Maandooriyaha ee Dadka Waaweyn — +\$23 milyan\*\***  
Waxay xoojinaysaa shabakadda adeegyada iyo taageerada la xidhiidha isticmaalka maandooriyaha, oo ay ku jiraan barnaamijyada daaweynta mukhaadaraadka iyo barnaamij cusub oo soo kabashada ku saabsan ku-tiirsanaanta kiimikooyinka.

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Hab-dhaqanka Caafimaad *(sii socda.)*



- **Horumarinta Shaqaalaha Caafimaadka Hab-haqanka — +\$15.2 milyan**  
Waxay taageertaa horumarinta iyo haynta shaqaale xirfad leh oo ka shaqeeya [caafimaadka hab-dhaqanka ee dadweynaha](#), iyada oo loo marayo [Sanduuqa ELEVATE](#), tababaro, iyo taageero farsamo oo la siiyo ururrada yaryar ee kala duwan ee u shaqeeya bulshada.
- **Lashaqaynta Bulshada iyo Taageerada Shabakadda — \$14.4 milyan**  
Waxay xoojinaysaa ka-qaybgalka bulshada iyo taageerada bixiyeyaasha adeegyada iyada oo loo marayo kaalmo farsamo, si loo hubiyo kaqaybgal dhab ah oo ay yeeshaan dhammaan 29-ka kooxood ee daneeyayaasha ee uu gobolku aqoonsaday (BHSA), kuwaas oo qaabeeya shaqada hab-dhaqanka caafimaadka ee gobolka.
- **Fayo-qabka Xarunta Hab-dhaqanka Caafimaadka — +\$12.7 milyan\*\***  
Waxay maalgelisaa naqshadeynta iyo horumarinta hore ee xarun isku-dhafan oo cusub oo laga dhisayo dhul uu degmadu leedahay oo ku yaalla Waddada Rosecrans ee Degmada Midway, taasoo isku dari doonta daryeel, guriyeyn, iyo adeegyo taageero. Degmadu waxay [heshay deeq dowladeed oo dhan \\$99.5 milyan oo loogu talagalay](#) mashruucan hab-dhaqanka caafimaadka bishii Maarj 2026.
- **[Daaweynta Goobta ee Xanuunada Dhimirka](#) — +\$9.6 milyan\*\***  
Waxay kordhisaa awoodda adeegyada bulshada ku saleysan ee beddelka u ah isbitaal dhigista, waxayna xoojisaa adeegyada inaan qofka dhakhtar la dhigin iyo adeegyada yaraynta ku tiirsanaanta dhakhtarka.

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Hab-dhaqanka Caafimaad



- **Dhismayaasha Hab-dhaqanka Caafimaadka — +\$3.5 milyan\*\***  
Waxay taageertaa hagaajinta xarumaha si loo horumariyo [Daryeel Deggenaansho oo Degdeg ah oo Carruurta loogu talagalay, iyo barnaamijyo daaweyn iyo](#) soo kabasho ee isticmaalka maandooriyaha, iyada oo loo adeegsanayo deeqo dowladeed.
- **Hab-dhaqanka Caafimaadka Dhalinyarta & Carruurta — +\$2 milyan\*\***  
Waxay mudnaan siisaa ka-hortag hore iyo dejinta xaaladaha degdegga ah ee carruurta iyo dhalinyarada.
- **Kooxaha Wacyigalinta Guryaha Dhexdooda ugu Taga — +\$1.1 milyan\*\***  
Waxay ka caawisaa isku xidhka dadka qaba xanuunnada dhimirka ee daran si ay u helaan daaweyn joogto ah iyo taageero.



# Maalgalinaha Mudnaanta leh Xasilinta Deegaanka



Tobannaan sano, bulshooyinka Koonfurta Bay waxay la kulmayeen dhibaato dikhawga xuduuda kasoo talaabay oo carqaladeeyay nolol maalmeedka, saameyay caafimaadka, isla markaana xaddideya helitaanka xeebaha nadiifka ah. Miisaaniyaddani waxay xoojinaysaa ka go'naanshahayaga caafimaadka, amniga, iyo hufnaanta, iyadoo la kordhiyo la socodka, la hagaajinayo warbixinnada dadweynaha iyo wacyigelinta, isla markaana la bixinayo warbixin degdeg ah oo isla maalintaas ah oo ku saabsan tayada biyaha xeebaha. Maalgelin dheeraad ah oo taageeraya ilaalin ballaadhan oo deegaanka ah oo ka jirta guud ahaan gobolka, taasoo dhisaysa bulshooyin badqaba oo caafimaad leh oo ka wada jira degmada oo dhan.

## Maalgalinaha waxa Kujira:

- **Ilaalinta Biyo-qabadka Gobolka & Ka-hortagga Wasakheynta Badaha — \$25.6 milyan (+\$2 milyan)\*\***

Waxay taageertaa [dedaallada ilaalinta biyo-qabadka ee yareeya wasakheynta badaha](#), isla markaana dhiirrigeliya xeebaha nadiifka ah, nidaam deegaan caafimaad leh, iyo biyo cabitaan oo badqaba.

- **Hagaajinta Leexinta Qashinka, Qhimista Qiiqa hawada, iyo Maareynta Goobaha Qashin-qubka ee Xidhan — \$25 milyan (+\$3.9 milyan)\*\***

Waxay isku darsataa barnaamijyo qashinka ka leexiya goobaha qashin-qubka iyo kuwa yareeya qiiqa gaaska kulaylka keena, iyadoo sidoo kale lagu sameeyo kormeer iyo maamul muddo dheer ah oo lagu hayo goobaha qashin-qubka ee xidhan, si loo ilaaliyo tayada hawada iyo biyaha dhulka hoostiisa, loona xoojiyo ilaalinta deegaanka ee gobolka.

- **Kormeerka Walxaha Halista ah & Ka Jawaabista Shilalka — \$17.6 milyan (+\$42,000)\*\***

Waxay bixisaa ilaalin dhammaystiran oo caafimaadka dadweynaha iyo badbaadada deegaanka ah, iyadoo ruqsad siisa lana kormeero in ka badan 14,000 xarumood oo ay yaalaan walxo halis ah, isla markaana xoojinaysa awoodda Kooxda Ka Jawaabta [Shilalka Walxaha Halista ah](#) si ay uga jawaabto uguna yareeyso xaaladaha degdegga ah ee kiimikooyinka iyo cabashooyinka dadweynaha.

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Xasilinta Deegaanka



- **Ilaalinta Dhul-beereedka, Ilaalinta Dhulalka Banaan & Badqabka Beeraha — \$17.3 milyan (+\$660,000)\*\***  
Waxay ilaalisaa dhaqaalaha beeraha ee gobolka iyo muuqaalka dabiiciga ah, iyadoo si joogto ah loo ilaaliyo dhul-beereedka, la ballaadhiyo [ilaalinta dhulka banaan](#), isla markaana la xoojiyo dedaallada lagu [ogaanayo laguna xakameynayo](#) cayayaanka waxyeellada leh ee khatar ku ah dalagyada iyo nidaamyada deegaanka ee deegaanka.
- **Maalgelinaha Dhimista Gaasaska Kulaylka keena ee la Xidhiidha Qorshaha Tallaabada Cimilada Laga Qaadayo — \$15 milyan (+\$3.9 milyan) (waxaa ku jira qaar ka mid ah barnaamijyada lagu xusay qaybaha kale ee miisaaniyadda)**  
Hirgelinta tallaabooyinka [Qorshaha Tallaabada Cimilada ee Degmada](#), kuwaas oo yareeya qiiqa gaaska kulaylka keena, hagaajiya tayada hawada, isla markaana xoojiya adkeysiga cimilada ee muddada dheer.
- **Maaraynta Khayraadka Biyaha Dhulka Hoostiisa — \$3.4 milyan**  
Waxay taageertaa maareynta biyaha dhulka hoostiisa ee muddada dheer, waxayna ilaalisaa badqabka biyaha ee gobolka.
- **Kor u Qaadista Tamarta Qorraxda & Dhisida Cagaaran — \$1.4 milyan**  
Waxay dhiirrigelisaa dhismooyin cagaaran waxayna dedejisaa isticmaalka tamarta qorraxda guud ahaan gobolka.
- **Ballaadhinta Qorshaha EV & Gaadiidka Korontada Ku Shaqeeya — \$1.2 milyan**  
Waxay horumarisaa [Qorshaha EV ee Degmada](#) iyadoo lagu beddelayo gaadiidka rasmiga ah gaadiid koronto ku shaqeeya, isla markaana lagu rakibayo xarumo cusub oo lagu dabeyo gaadiidka goobahaas waxaa kamid ah Campo RMS, Julian RMS, Pine Valley Park, Tijuana River Valley Regional Park, El Monte Park, iyo Lake Morena Park.

(sii socda.)

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Xasilinta Deegaanka



(sii socda.)

- **Dhir Beerista — \$500,000**

**Beerista 1,000 geed oo cusub** si loo horumariyo tayada hawada, loo kordhiyo daboolista hadhkooda isla markaana loo taageero caafimaadka xaafadaha. Intaa waxa dheer dhir beerista lagu sameeyo dhulka ay degmadu leedahay si loo taageero yoolalka tallaabada cimilada, barnaamijka geedaha ee **dhulka gaarka loo leeyahay** wuxuu siinayaa milkiilayaasha dhulka gaarka ah ee goobaha aan la isku darin ama wakiilladooda geedo 15-gallon ah oo bilaash ah si ay iyagu u beertaan.

- **Sarkaalka Dikhawga ee Iskuduwida Hawlaha Gobolka ee Tijuana River Valley**

Waxay maalgelisaa Sarkaal cusub oo Dikhawga ah si uu u hoggaamiyo wadashaqaynta gobolka, u aqoonsado ilaha khayraadka, isla markaana u wado xalal muddo dheer ah oo loogu talagalay Tijuana River Valley. Tani waxay daboolaysaa qorista shaqaalaha, mushaharka iyo kababka qofka xilka haya, iyo sidoo kale kharashaadka bilowga ah ee la xiriira isku-dubaridka iyo ku-darista shaqadan nidaamka.



# Maalgalinaha Mudnaanta leh Guriyeynta iyo Hoy la'aanta



Marka qof waayeel ah uu awoodi karo kirada, qof dhalinyaro ah uu helo xasillooni guri ama qoys uu galo hoy ammaan ah, guud ahaan gobolkayagu wuu ka faa'iideystaa. Qorshahan wuxuu maalgelinayaa xalal wax ku-ool ah oo udub dhexaad u ah dadka — laga bilaabo [taageerada kirada iyo baarkinka ammaan ah](#) ilaa [barnaamijyo guri oo hal-abuur leh](#) iyo hufnaan xogeed oo waqtiga dhabta ah — si xaafado badan ay u helaan waddo ay ku gaadhaan xasillooni iyo guri.

## Maalgalinaha waxa Kujira:

- **\$93.1 milyan** [si loo kordhiyo kheyraadka guriyeynta ee dadka nugul](#)  
Waxay taageertaa horumarinta guryo la awoodi karo iyo guryo taageero leh, kaalmada kirada, iyo adeegyo ka caawiya qoysaska inay gaadhaan isku-filnaansho. Waxa kamid ah:
  - **\$16 milyan oo wadar ahaan ah**, oo ay ku jiraan \$11.6 milyan oo ka timid miisaaniyaddii sanadkii hore, loona [goondeeyay Barnaamijka Kaalmada Dadka Hoy la'aanta ah ee Gobolka](#) iyo Barnaamijka Cimilada Adag. Waxay bixisaa hoy ammaan ah oo muddo-gaaban ah, iyadoo lagu meeleeyo hoteello isla markaana la bixiyo risiidho hoteel/albeerko ah xilliyada qabowga ama roobka, looguna talagalay dadka deggan goobaha aanay magaaladu maamulin ee u baahan hoy degdeg ah.
  - **\$3.4 milyan loogu talagalay** [Guriyeynta Barnaamijkayaga Dhalinyarta](#)  
Waxay sii waddaa guryo gaar ah iyo adeegyo taageero oo loogu talagalay dhalinyarada da'doodu u dhexeyso 18–24, iyadoo boqollaal dhalinyaro ah ku xidhaysa xasillooni iyo fayo-qab muddo dheer ah.
  - **\$2.8 milyan oo loogu talagalay maalgalinta sanadlaha ah** [Barnaamijka Kaalmada Kirada Kooban](#)  
Waxay bilaabaysaa wareeg cusub oo taageero ah oo loo fidinayo 200 qoys oo dad waaweyn ah, iyadoo la siinayo kaalin kirada ah oo dhan \$500 bishii muddo 18 bilood ah, si looga hortago hoy la'aanta loona taageero sii haynta guriyeynta.

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Guriyeynta iyo Hoy la'aanta



(sii socda.)

- **\$1.6 milyan oo ka timid miisaaniyaddii sanadkii hore si loo kordhiyo Barnaamijka Guriyeynta Hal-abuurka leh ee LGBTQ+.**  
Waxay sii waddaa maaraynta kiisaska, adeegyada taageerada, iyo hagidda guriyeynta ee dadka LGBTQ+ ee la kulmaya hoy la'aanta.
- **\$1.6 milyan oo ka timid miisaaniyaddii sanadkii hore oo loogu talagalay Barnaamijyada Goobaha Baabuurta ee badqaba ee Bancroft iyo Magnolia**  
Waxay maamushaa 43 goobood oo baarkin ammaan ah oo leh adeeygo goobta yaalla, si loo taageero dadka ku nool gaadiidkooda inta ay u gudbayaan guryo joogto ah.
- **\$29.2 milyan oo loogu talagalay taageerada guriyeynta iyo adeegyada horumarinta guryaha.**  
Waxay maalgelisaa horumarinta guryo waara, barnaamijyada la awoodi karo, hindisayaasha guryaha yaryar iyo guryaha dheeraadka ah ee ku xiran (ADU), nadiifinta iyo kaalmada la xidhiidha hoy la'aanta, kormeerka, iyo fududeynta dib u eegista isticmaalka dhulka.
- **\$600,000 oo loogu talagalay barnaamijka Shelter Ready ee Xeer Ilaaliyaha Degmada**  
Waxay xoojinaysaa hufnaanta waqtiga-dhabta ah iyadoo taageeraysa qalab hal-abuur leh oo isku xidha dadka la kulma hoy la'aanta iyo barnaamijyada hoy degdeg ah iyo goobo baabuurta la dhigto oo ammaan ah.



# Maalgalinaha Mudnaanta leh Kaabeyaasha



Kaabeyaasha casriga ah ee la isku halayn karo waxay taageeraan nolol maalmeedka iyo kooxda Degmada ee sii haysa shaqooyinka iyo adeegyada bulshooyinka. Qorshahan wuxuu maalgelinayaa nidaamyada iyo xarumaha muhiimka ah ee Degmada—laga bilaabo biyaha roobka iyo waddooyinka ilaa goobaha nasashada, xabsiyada iyo maktabadaha—si loo hubiyo in casriyeyntu ay la jaanqaado baahiyaha bulshada, isla markaana ay hagaajiso badbaadada, helitaanka adeegyada, iyo tayada nolosha.

## Maalgalinaha waxa kujira:

- **Maalgashiyada Badqabka Waddooyinka iyo Dayactirkooda — \$265.9 milyan (+\$19 milyan)\*\***

Waxay maalgelisaa hagaajino ay ka mid yihiin calaamadaha taraafikada ee cusub, jaranjarooyinka laamiga, meelaha ay gudbaan dadka lugeynaya, iyo biraha ilaalinta, waxayna taageertaa dayactirka 2,000 mayl oo waddooyin Degmo ah oo ku yaalla bulshooyinka aan ku jirin maamulka magaalada, si loo xaqiijiyo safar ammaan ah oo la isku halayn karo.

- **Kordhinta Dayactirka Xarunta iyo Badqabka — \$73.3 milyan**

Waxay maalgelisaa dayactirro muhiim ah, ilaalinta xarumaha, iyo casriyeynno waaweyn oo badqaba oo laga sameeyo xarumaha Degmada oo dhan, oo ay ka mid yihiin:

- *Dayactir lagu sameeyo Xabsiga Dhexe ee San Diego, kaamirooyin cusub oo lagu rakibo Xarunta Xabsi ee George F. Bailey iyo Xarunta Dhaqancelinta ee East Mesa, iyo hagaajin lagu sameeyo Xarunta Xabsi ee Rock Mountain.*
- *HVAC iyo saqafka Xarunta Hawlgallada Degdegga ah ee Degmada, iyo sidoo kale hagaajinta HVAC ee Xafiisyada San Marcos iyo Xarunta Daryeelka Xirfadaha ah ee Edgemoor.*
- *Ku rakibidda kaabeyaasha lagu dabeeyo gaadiidka korontada ee guud ahaan Degmada.*
- *Waxay ilaalisaa badqabka iyo nadiifnimada goobaha nasashada iyo xarumaha maktabadaha iyadoo la sameeyo dayactir joogto ah, hagaajin, iyo xakamaynta haramaha.*

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Kaabayaasha *(sii socda.)*



- **Kahortaga Daadadka iyo Fatahaadaha — \$61.7 milyan**

Waxay taageertaa ka hortagga fatahaadaha roobka iyadoo la dayactirayo tuubooyinka biyo-mareenka, kanaallada, iyo godadka daadadka roobku ka baxaan, waxayna maalgelisa hawlgalka iyo dayactirka nidaamka bullaacadaha iyo goobaha biyaha ee Degmada.

- **Hawlaha Goobaha Nasashada & Maddaadalada — \$37.7 milyan(+\$1.8 milyan)\*\***

Waxay maamushaa 159 xarumood oo goobaha nasashada ah, 60,000 acre oo dhul goobo nasasho ah, iyo 398 mayl oo waddooyin socod ah oo ay ku raaxaystaan dadka deegaanka iyo dalxiisayaashu.

- **Baddelista Saldhiga Taliska Ramona — \$34.3 milyan**

Waxay dhisaysaa Saldhig cusub oo Taliska Ramona ah si uu u beddelo xaruntii hore ee la dhisay 1970-meeyadii, taasoo xoojinaysa adeegyada badqabka dadweynaha ee gobolka.

- **Hawlaha Maktabada — \$71.5 milyan (+\$2.4 milyan)\*\***

Nidaamka Maktabadda Degmada wuxuu maamulaa 33 laamood oo maktabado ah, afar gaadhi oo koronto ku shaqeeya oo adeegga gaadhsiiya bulshada, iyo shan meelood oo ah goobaha iskood looga heli karo buuggaagta. Miisaaniyaddani waxay ilaalisaa saacadaha shaqada si loo hubiyo helitaanka agabka, barnaamijyada, iyo kheyraadka kale. Sannadka 2025, nidaamka maktabaduhu wuxuu qaybiyey 11.79 milyan oo agab ah, taasoo ka dhigaysa mid ka mid ah nidaamyada maktabadaha ugu waaweyn ee California, dalka, iyo adduunkaba.

- **Qorsheynta Xarunta Xabsiga ee Vista — \$3 milyan**

Waxay bilaabaysaa qorsheynta, qiimeynta deegaanka, iyo naqshadaynta Xarun Xabsi oo cusub oo Vista ah si loo daboolo baahiyaha hawlgal ee muddada dheer.

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Kaabeyaasha



- **Maalgashiyada Xarumaha Bulshada**

Waxay sii waddaa maalgelinta xarumo cusub iyo kuwo la casriyeeyay oo u adeega bulshada, oo ay ku jiraan [Maktabadda Casa de Oro](#) — oo la furayo xagaaga 2026 iyadoo labanlaab ka weyn booskii hore [Epicentre in Mira Mesa](#), oo dib loo furayo iyadoo ah xarun bulsho iyo dhalinyaro oo Degmadu maamusho, laguna qaabeeyey ka qaybgal ballaadhan oo bulshada samaysay.



# Maalgalinaha Mudnaanta leh Badqabka Dadweynaha



Badbaadadu kama koobna oo keliya waqtiga jawaabta — waxay sidoo kale ku saabsan tahay u-diyaargarow, ka hortag, iyo daryeel loo fidiyo dhammaan dadka. Miisaaniyaddan waxay xoojineysaa adeegyada gurmada degdegga ah, waxay taageertaa dadka xidhan iyadoo la siinayo adeegyada caafimaad iyo daryeelka hab-dhaqanka ee ay u baahan yihiin, waxayna kordhisaa ilaalinta macaamiisha si dadka deggan bulshada loola dhaqmo si caddaalad ah. Waxay ka caawisaa ilaalinta qoysaska, dhowrista karaamada dadka, waxayna maalgelisaa nidaamyada adeegga guud si ay ugu shaqeeyaan habka ay dadku filayaan una qalmaan.

## Maalgalinaha waxa Kujira:

- **Hawlaha Dab-damiska iyo Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah — \$84.5 milyan oo doolar (+\$8 milyan)**  
Waxay xoojineysaa [adeegyada dab-damiska iyo caafimaadka degdegga ah](#) ee deegaannada aan hoos iman maamul degmo rasmi ah, oo ay ku jirto shaqaale dheeraad ah oo loo qoondeeyay baabuurta biyaha qaada ee geeya biyo tiro badan goobaha dabka ka kacay.
- **[Helikobtarka Habeenkii Duusha ee Dab-damiska Degmada](#)**  
Waxaa la filayaa inuu diyaar u noqdo adeegga FY 2026–27, wuxuuna matalayaa maalgelin weyn oo heer gobol ah oo kordhinaya awoodda muhiimka ah ee la tacaalidda dababka duurka iyo xaaladaha degdegga ah xilliyada habeenkii.
- **[Guddiga Dib u Eegista Hirgalinta Sharciga Muwaadinka \(CLERB\) — \\$600,000](#)**  
Waxay taageertaa doorka kormeer ee la kordhiyay ee CLERB, oo ay ku jiraan wacyigelin, horumarinta siyaasadaha, baadhitaanno, iyo khibrad gaar ah oo ku saabsan kiisaska caafimaad.
- **Isku-xirka Daryeelka Bulshada iyo [Beddelka Xabsiga](#) — 5.5 milyan oo doolar**  
Waxay isku xidheysaa dadka ku lug leh nidaamka cadaaladda ee leh baahiyo caafimaad iyo caafimaad-dhaqan oo muhiim ah, iyadoo la gaadhsiiyo guri, daaweyn, daryeel caafimaad, waxbarasho iyo shaqo.

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Badqabka Dadweynaha



(sii socda.)

- **Adeegyada Kahortaga Dambiyada, Baddelka & Dhaqan-celinta — \$4.5 milyan**  
Adeegyada Kahortaga Dambiyada, Baddelka & Dhaqan-celinta, iyo taageerada dib u soo-laabashada bulshada, oo ay ku jirto Xarunta Kheyraadka iyo Dhaqan-celinta cusub, halkaas oo dadka ay ka heli karaan maareynta kiisaska, taageerada asxaabta, daaweyn, daryeel caafimaad, iyo kaalmo gaar ah kadib xabsi, qabasho ama xidhiidh booliis.
- **Ballaadhinta Ka-hortagga Rabshadaha ee ay Bulshadu Hoggaamiso ee — Spring Valley — \$250,000**  
Waxay taageertaa hirgelinta barnaamijka Ma Jirto Rasaas La Ridayo iyada oo loo marayo wacyigelin, hagid, iyo adeegyo- taageero oo dhammaystiran, kuwaas oo ujeedkoodu yahay yareynta rabshadaha kooxaha gaangiska iyo kuwa hubka haysta, iyadoo la adeegsanayo hab ay bulshadu hoggaamiso oo -diiradda saaraya ka-hortagga.
- **Barnaamijka Yaraynta Xasaradaha Hubka — \$227,000**  
Waxay taageertaa hab ku saleysan caafimaadka dadweynaha oo lagu yareynayo isdilka, rabshadaha qoyska, iyo rabshadaha bulshada, iyadoo la adeegsanayo wax ka qabasho, hagaajinta ka jawaabista xaaladaha degdegga ah, iyo iskaashi u dhexeeya caafimaadka dadweynaha, hay'adaha fulinta sharciga, iyo shuraakada bulshada.



# Maalgalinaha Mudnaanta leh Bulshooyinka Nugul



Shabakadda badqabka bulshada ee Degmadu waxay ilaalisaa deriskeenna ugu nugul, iyadoo bixisa adeegyo kala duwan oo ay ka mid yihiin cunto, daryeel caafimaad, taageero guriga lagu helo, iyo ilaalin sharci. Miisaaniyaddan waxay u diyaar garowdaa saameynta H.R. 1 — sharci fadaraal ah oo beddelaya shuruudaha u qalmitaanka adeegyo taageero oo badan, si qoysasku u xasilloonaadaan una sii haystaan fursadaha nololeed ee ay heli karaan. Dhanka kale, [shaashadaha xogtu kasoo muuqanayso](#) waxay bixiyaan aragti ku saabsan sida maalgelintan ay u horseeddo horumar macno leh oo ka socata guud ahaan gobolka.

## Maalgalinaha waxa kujira:

- **Adeegyada U-qalmitaanka iyo Isku-filnaanshaha — \$852 milyan**

Waxay taageertaa CalFresh, CalWORKs, Medi-Cal iyo Caawimaadda Guud, oo ay ku jiraan \$23.7 milyan oo doolar oo ku xidhan shuruudaha maamulka fadaraalka ee H.R. 1 ee CalFresh iyo shaqaale la xidhiidha si loo caawiyo dadka deggan inay sii haystaan kababkooda.

- **Fayo-qabka Carruurta iyo Qoysaska — \$502 milyan**

Waxay maalgelisa xoojinta qoysaska, ka-hortagga dhibaatooyinka, iyo adeegyada ilaalinta carruurta, iyadoo in ka badan \$163 milyan oo doolar loo qoondeeyay qoysaska daryeela carruurta si ku meelgaadh ah iyo si joogto ahba.

- **Adeegyada Taageerada Guriga Gudahiisa (IHSS) — \$248.7 milyan**

Waxay ku jirtaa \$25.2 milyan oo maalgelin cusub ah oo lagu taageerayo ku dhawaad 50,000 oo dad nugul ah iyo dadka naafada ah, iyadoo la siinayo caawimaad daryeel guri iyo daryeel gaar ah.

- **Caafimaadka iyo Daryeelka Caafimaadka Xabsiyada — \$198.9 milyan (+17.9 milyan).**

Waxay taageertaa daryeelka caafimaadka ee dadka waaweyn ee ku jira xabsiyada.

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Bulshooyinka Nugul



*(sii socda.)*

- **Caafimaadka iyo Daryeelka Caafimaadka Dhallinyarada ku jira Xabsiyada — \$14.36 milyan (+\$2.38 milyan).**  
Waxay ilaalisaa isla markaana horumarisaa adeegyada caafimaadka iyo daryeelka caafimaad ee dhallinyarada ku jira xabsiyada.
- **Adeegyada Xayawaanada — \$12.2 milyan (+\$500,000)\*\***  
Lacagaha hirgalinta, [hoysga](#) iyo [daryeelka xoolaha](#) ee jooga goobaha aanay magaaladu maamulin iyo [adeegyada](#) korsashada guud ahaan degmada.
- **Barnaamijka Difaaca Sharciga Muhaajiriinta — \$13.2 milyan**  
Waxay siisaa [matalaad sharci oo loo fidiyo muhaajiriinta](#) la hayo iyo carruurta aan cid la socon ee ku jira dacwadaha masaafurinta. Waxay ka kooban tahay \$5.5 milyan oo maalgelin hal mar ah iyo \$7.7 milyan oo joogto ah, taas oo ah korodh dhan \$2.7 milyan marka loo eego sanadkii hore.
- **Xafiiska Taliska (Sharciga 36) — \$15.3 milyan**  
Waxay ku dartay 23 shaqaale labada galinba ah si loo taageero kordhinta tirada dadka xabsiga lagu soo qabto iyo baahiyaha hawlgaal ee la xidhiidha.
- **Difaaca Dadweynaha (Sharciga 36) — \$4.82 milyan**  
Waxay ku dartay 18 shaqaale oo labada galinba ah si loo daboolo kiisas badan oo shaqo oo kordhay, loona hubiyo bixinta matalaad sharci oo waqtigeeda ku timaadda, isla markaana waafaqsan dastuurka, dadka aan awoodin inay qareen iska bixiyaan.
- **Tijaabada (Sharciga 36) — \$2.97 milyan**  
Waxay ku dartay 15 shaqaale oo labada galinba shaqeeya si loo kordhiyo kormeerka dadka xukunka sugaya iyo kuwa dembiyada culus, isla markaana loo taageero qiimeyn kordhay, daaweyn, iyo baahiyaha guri ee dadkaasi u baahan yihiin.

*(sii socda.)*

# Maalgalinaha Mudnaanta leh Bulshooyinka Nugul



(sii socda.)

- **Helitaanka Khadka Maktabadda — \$381,000 (+\$35,000)\*\***  
Waxay bixisaa Khad bilaash ah oo 24/7 ah oo laga helo xarumaha maktabadaha Degmada.
- **Barnaamijka Maktabadda Dugsiga Sare — \$245,000 (+\$7,000)\*\***  
Waxay sii waddaa barnaamijka ka caawiya dadka waaweyn inay helaan shahaadada dugsiga sare.
- **Tababarka Muwaadinimo — \$221,000 (+\$20,000)\*\***  
Waxay bixisaa tababar iyada oo loo marayo Maktabadda Degmada si loo taageero dadka deggan Degmada ee doonaya inay helaan dhalashada.
- **Adeegyada Taageerada Ilmaha**  
Waxay taageertaa fayo-qabka maaliyadeed, dareen iyo caafimaad ee ku dhowaad 39,900 qoys oo ku nool guud ahaan gobolka.



# Muhiimadaha Kale



Degmadu waxay maalgelisaa barnaamijyo iyo adeegyo kala duwan oo xoojiya caafimaadka bulshada, amniga, iyo tayada nolosha maalin kasta. Maalgelinahani waxay kordhiyaan helitaanka ilaalinta caafimaadka dadweynaha, caddaaladda macaamiisha, daryeelka xayawaanka carbiska ah, badqabka deegaanka, iyo adeegyada muhiimka ah ee ay dadku ku tiirsan yihiin guud ahaan gobolka.

## Maalgalinaha waxa kujira:

- **Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha — \$235.6 milyan**

Waxay ilaalisaa caafimaadka bulshada iyada oo loo marayo ka hortagga cudurrada faafa, xakamaynta cudurrada, xarumaha caafimaadka dadweynaha, barnaamijyada booqashada guryaha, iyo adeegyada dawooyinka oo hubiya in daryeel caafimaad si ballaadhan loo heli karo.

- **Baadhista Badqabka Cuntada — \$18 milyan (+\$1.6 milyan)\*\***

Waxay ilaalisaa caafimaadka dadweynaha iyada oo baadha 15,700 hudheel, gawaadhida cuntada iibisa iyo xarumo kale oo cunto, waxay taageertaa 530 munaasabado ku-meelgaadh ah, waxayna fulisaa 1,200 baadhitaan oo cabashooyin kasoo baxeen iyo 520 baadhitaan oo ku saabsan cudurrada ka dhasha cuntada.

- **Ballaadhinta Ilaalinta Macaamiisha ee Xeer-ilaaliyaha Degmada — \$16.3 milyan (+\$11 milyan).**

Waxay ballaahisaa hawlaha ilaalinta macaamiisha ee guud ahaan degmada si loo baaro loona qiimeeyo warbixinnada ku saabsan khiyaano iyo dhaqammo ganacsi oo aan caddaalad ahayn, isla markaana loo qaado tallaabooyin ku habboon si loo ilaaliyo shacabka.

- **Xafiiska Fanka & Dhaqanka iyo Filimada — \$3.25 milyan**

Waxay maalgelisaa hindisayaasha fanka iyo dhaqanka, waxayna taageertaa hirgelinta xafiiska filimada

*(sii socda.)*

# Muhiimadaha Kale

(sii socda.)



- **Waaxda Caddaaladda Macaamiisha iyo Ilaalinta Dadweynaha — \$2.4 milyan**  
Waxay dhisaysaa koox cusub oo ka kooban siddeed qof oo ka tirsan Golaha Degmada, kuwaas oo diiradda saaraya ilaalinta macaamiisha, badqabka alaabta, xadgudubka maaliyadeed, tartan aan caddaalad ahayn, u sinnaanta deegaanka, iyo u sinnaanta dhaqaalaha, iyadoo la kordhinayo dedaallada lagu ilaalinayo macaamiisha isla markaana lala shaqeynayo hay'adaha kale ee fulinta sharciga, sida Xeer-ilaaliyaha Degmada San Diego iyo Xeer-ilaaliyeyaasha Magaalada.
- **Xakamaynta Cayayaanka iyo Ka-hortagga Xanuunada Kadhasha Kaneecada — \$16 milyan (+\$455,000)\*\***  
Waxay kormeertaa oo daaweysaa in ka badan 1,600 goobood oo ay kaneecadu ku taranto si loo ilaaliyo dadka deggan West Nile iyo cudurrada kale ee ay kaneecadu gudbiso.
- **Tijaabinta Tayada Biyaha Xeebta — \$1.9 milyan (+\$257,000)\*\***  
Waxay bixisaa baadhitaan tayada biyaha xeebaha ah oo isla maalintaas la sameeyo iyo warbixin dadweyne oo laga diyaariyo 45 goobood, taas oo ka caawisa dadka inay helaan xog oo ay badqab ku ahaadaan.



# Muhiimadaha Kale

(sii socda.)



- **Anshaxa, U Hogaansanaanta & Heerarka Shaqaalaha — \$300,000**

Waxay ku dartaa wax u dhigma laba boos oo shaqo oo labada galinba ah si loo xoojiyo fulinta heerarka shaqada, loo kordhiyo badqabaka goobaha nasashada ee degmada, loona hagaajiyo dedaallada u hoggaansanaanta qandaraasyada.

- **Waaxda Qaliinada Xoolaha ee Wareegta**

Waxay si toos ah ugu keenayaan adeegyada taran ka joojinta labka/dhediga iyo daryeelka aasaasiga ah ee xayawaanka carbiska ah iyo bulshada aan si fiican adeegyada u helin iyo meelaha baahidu ka badan tahay ee aan hoos iman degmooyin rasmi ah, iyadoo hagaajinaysa caafimaadka xoolaha iyo helitaanka adeegyada qoysaska.





[www.sandiegocounty.gov](http://www.sandiegocounty.gov)

1600 Pacific Highway, San Diego, CA 92101